# War murtiyeedka Shirka aan caadiga ahayn ee Horumarinta Beeraha Africa ama Comprehensive African Agriculture Development Program (CAADP)

Wafdi Sare oo uu hogaaminayay Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Dr. Hassan Sheikh Mohamoud, ayna ka mid ahaayeen Wasiirka Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka Xil. Mohamed Abdi Hayir-Mareye, Wasiirka Arimaha Dibedda Xil. Ahmed Moalim Ahmed Fiqi, Safiiradda Soomaaliya ee Yugaandha, iyo Safiirka Itoobiya ahna uqaabilsanaha Soomaaliya ee Midowga Africa, Agaasimayaal iyo khuburo ka socotay Wasaaraddaha Beeraha iyo Waraabka iyo Arimaha Dibedda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed ayaa Magaaladda Kampala ee Caasimadda Yugaandha uga qayb galay Shirka aan caadiga ahayn ee Horumarinta Beeraha Africa ama Comprehensive African Agriculture Development Program (CAADP)

Shirka oo socday sadex berri 9-11 Janaayo waxaa isugu yimid oo lagu marti qaaday Madaxweynayaasha, Wasiiradda Beeraha iyo Wasiiradda Arimaha Debeda ee dalalka Africa, waxaana looga hadlayey sidii Africa u gaadhi lahayd isku filnaansho cunto. Shir madaxdeedkan Africa waxaa madaxda loogu soo bandhigay Balanqaadka Kambaala iyo qorshaha horumarinta Beeraha ee 10 ka sanoo soo socata (Kampala CAADP Declaration and CAADP strategy and action plan 2026-2035) kasoo qeexaya ballanqaadyada Madaxda Dawladaha xubnaha ka ah Midowga Afrika si loo gaaro nidaamyo waara oo cunto isku dhafan ee qaaradda Afrika.

Wasaaradda Beeraha ee Soomaaliya waxay soo bandhigtay sida beerahu laf-dhabar ugu yihiin dhaqaalaha dalka kaas oo ay in kabadan 70% shacabka Soomaaliyeed ay ugu tiirsanyihiin quutul daruurigooda, 80% soo saara dakhliga gudaha sidoo kalena qayb lixaad leh ka qaata u samaynta fursado shaqo abuur shacabka Soomaaliyeed gaar ahaan dumarka iyo dhalinyarada; sidoo kale Wasaaraddu waxay la wadaagtay dawladaha Africa fursadaha maalgeshi ee beeraha iyo caqabadaha haysta beeralayda Soomaaliyeed dhinacyada waraabka, beera gashiga (abuurka, bacrimiyayaasha iyo dulin-dilayaasha) cilmi baarista, qalabka beeraha, suuqyada iyo saamaynta taban ee isbedelka cimilada.

Maadaama beeruhu ay ahmiyadaas u leeyihiin shacabka Soomaaliyeed iyo dawlad dhiskaba waxay dawladda Federaalka Soomaaliyeed iyo Wasaaradeeda Beeraha iyo Waraabku ahmiyad gaar ah siinaysaa kordhinta wax soosaarka beeraha iyo kor u qaadida tacbashada Beeraha, tasoo loo gartay inay tahay habka kaliyah ee Soomaaliya ku gaari karto isku filnaansho gudaha, sare uqaadida dhoofka iyo dhaqaala koror guud.

**Soomaaliya waxay ka soo jeedisay shirka Barnaamijka Horumarinta Beeraha ee Afrika (CAADP)**

Soomaaliya waxay mar kale xaqiijisay sida ay uga go'an tahay Barnaamijka Horumarinta Beeraha Afrika ee Midowga Afrika (CAADP) intii lagu guda jiray shirkii aan caadiga ahayn, iyadoo iftiimisay aragtideeda ku aaddan horumarinta beeraha waara ee qaaradda. Waxaana tan lagu muujiyay qodobbadan hoos ku xusan:

1. Soomaaliya waxay si dhow ula shaqeyn doontaa Midowga Afrika iyo dowladaha xubnaha ka ah si loo gaaro yoolalka ballaaran ee ku qeexan qaab-dhismeedka CAADP.
2. Qaab-dhismeedka CAADP wuxuu waafaqsan yahay mudnaanta qaranka Soomaaliya wuxuuna ka hirgalayaa mashaariic kala duwan si loogu beddelo maxsuul waara ee horumarinta beeraha.
3. Soomaaliya waxay aqoonsatay doorka muhiimka ah ee CAADP uu ka ciyaarayo kordhinta wax soo saarka beeraha, xaqiijinta ammaanka cuntada, iyo kor u qaadista isticmaalka waara ee kheyraadka dabiiciga ah.
4. Soomaaliya waxay aqoonsatay caqabadaha ka dhashay isbedelka cimilada, kororka tirada dadka, magaalooyinka, iyo xiisadaha caalamiga ah ee ku saameeyay beeraha, waxayna ku baaqeysaa tallaabo wadajir ah si wax looga qabto.
5. Hoggaanka Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud, Soomaaliya waxay diiradda saareysaa casriyeynta beeraha iyada oo loo marayo horumarinta waraabka, cilmi baarista, iyo isticmaalka mashiinada casriga ah.
6. Soomaaliya waxay xoogga saaraysaah Hindisaha Qaran ee sare u qaadida wax soo saarka beeraha si loo yareeyo ku-tiirsanaanta wax-soo-saarka dibadda loona gaaro isku filnaansho ku aaddan dalagyada muhiimka ah.
7. Beeruhu weli waa laf-dhabarta dhaqaalaha Soomaaliya, waxay shaqo siiyaan malaayiin qof waxayna door muhiim ah ka qaataan horumar waara oo gobolku gaaro.
8. Soomaaliya waxay adkeynaysaa muhiimadda hal-abuurka isku-dhafan ee casriga ah si loo dhiso nidaamyo beeraha iyo cunto oo adkaysi leh oo Afrika ah.
9. Si looga hortago musiibooyinka iyo caqabadaha, Soomaaliya waxay ka go'an tahay xoojinta silsiladaha sahayda, abuurista nidaamyo wax soo saar oo kala duwan, iyo taageeridda bulshooyinka nugul iyada oo la maalgelinayo barnaamijyada shabakadaha badbaadada bulshada.

10. Soomaaliya waxay adkeyneysaa in iskaashi wadajir ah, ka go'naansho, iyo midnimo ay gaaraan dawladaha Afrika ay lama huraan u tahay xaqiijinta ammaanka cuntada, madax-bannaanida, iyo mustaqbal barwaaqo leh oo jiilasha soo socda ay mahadiyaan.
11. Ugu dambayn Intii uu shirkani socday dawladda Soomaaliya waxay si rasmi ah u gudbisay codsi ay ku dalbanayso inay marti geliso xarunta hay'adda badbaadada cuntada Africa (African Food Safety Agency headquarter) taasoo ay dawladda Soomaaliyeed u aragtay inay muhiim u tahay gaarida hadafyada u dagsan dalka oo ay ugu wayn yihiin sii xoojinta iyo ka faaiidaysiga dhex-galka Soomaaliya ee qaarada, urur goboleedyada iyo caalamka, ka faaidaysiga khayraadka dabiiciga ah iyo raadinta suuqyo wax ku ool u noqda wax-soosaarkeena, ganacsiga, ka faaiidaysiga bogcada istiraatijiyadeed ee Soomaaliya, isku xirka aduunka iyo Soomaaliya iyo fursad u abuurida dhalinyaradda Soomaaliyeed kuwaas ay dhamaan kusoo kordhin doonto xaruntani. Tani waxay muujinaysa ka go'naanshaha Soomaaliya in ay gacan ka geysato badbaadada cuntada iyo tayada guud ahaan qaaradda.

## Shirka Kambaala waxaa la isku raacay qodobadaan soo socda:

Intii uu socday shirkani waxay madaxda dawladaha Afrika qalinka ku duugeen lix ballanqaad oo gundhig u ah Cahdiga Kambaala, kaasoo faraya dawladaha xubnaha ka ah midawga Afrika inay u hogaansamaan, dhaqan geliyaan ixtiraamaana balanqaadyadan hoos ku xusan :

## 1. Kordhinta Wax Soo Saarka Cuntada, Wershadaha Beeraha, iyo Ganacsiga

- **Hadafka balanqaadka-** Kordhinta wax soo saarka cuntada 45% ilaa 2035, yaraynta khasaaraha goosashada waxsoo saarka 50%, saddex jibbaarida ganacsiga cuntada gudaha Afrika, iyo kor u qaadista saamiga cuntada maxalliga ah ee la farsameeyo ilaa 35% GDP-ga beeraha.

## 2. Kor u Qaadista iyo horumarinta Maalgelinta iyo Maaliyadda ee Nidaamka Cuntada

- **Hadafka balanqaadka-** u qareemida iyo helida $100 bilyan oo maalgelin dadweyne iyo mid gaar loo leeyahay ah ilaa 2035, hubinta in 10% miisaanayada dawladaha Afrika loo qoondeeyo nidaamka cuntada iyo beeraha sanad walba, iyo in ugu yaraan 15% GDP-ga beeraha dib loogu maalgeliyo beeraha.

## 3. Hubinta Ammaanka Cuntada iyo Nafaqada

- **Hadafka balanqaadka**- Ciribtirka gaajada ilaa 2035, yaraynta hagaaska, macluusha, iyo cayilka 25%, iyo hubinta in 60% dadka ay heli karaan cunto caafimaad leh.

## 4. Horumarinta ka qaybgalka iyo nolosha sinnaanta ku dhisan

- **Hadafka balanqaadka-** Yaraynta saboolnimada ba'an 50%, hoos-udhigida takoorka wax soo saarka ragga iyo dumarka 50%, iyo awoodsiinta 30% haweenka, dhalinyarada, iyo kooxaha la heybsooco ee ku jira silsiladaha qiimaha cuntada ilaa 2035.

## 5. Dhisidda Nidaamyada Cunto oo adag

- **Hadafka balanqaadka-** Hubinta in 30% dhulka beeraha loo maareeyo si waarta iyo in 40% qoysaska beeralayda laga ilaaliyo dhibaatooyinka waxsoo saar xumada iyo waxyeelada isbedelka cimilada ilaa 2035.

## 6. Xoojinta Maamulka iyo Isla Xisaabtanka

- **Hadafka balanqaadka-** Hubinta in dhammaan xubnaha AU ay ku daraan Kampala CAADP Declaration qorshahooda maalgashiga cuntada heer qaran iyo gobol ilaa 2028.

**Gabagabadii, Kadib saxiixa iyo aqbalida balanqaadka oo ay Soomaaliya saxiixday waxa uu farayaa Madaxda Dawladda Soomaaliya iyo dhamaan Madaxda Dawladaha Afrika:**

1) Inay balanqaadaan inay samaynayaan oo waafajiyaan siyaasadohooda, istiraatiijiyadohooda, iyo miisaaniyadahooda qorshahan horumarinta beeraha ee Afrika.

2) inay sameeyaan oo la hirgeliyo siyaasado dhammaystiran oo midaysan oo dhiirigelinaya maalgelinta ganacsiyadda gaarka loo leeyahay (Private sector) ee horumarinta nidaamyada cuntada iyadoo la hubinayo taageerada waxtarka leh ee qaybta dadweynaha nidaamyadan.

3) Kordhinta maalgelinta kaabayaasha ganacsiga, cilmi baarista beeraha, iyo adeegyada fidinta si loo taageero is beddel degdegga oo ku yimaada nidaamyada cuntada.

4) Hubinta in nidaamyada isku dubaridka waxtarka leh la diyaariyo iyo in ka qaybgalka loo dhan yahay laga hirgeliyo maamulka nidaamyada cuntada, iyadoo diiradda la saarayo haweenka, dhalinyarada, iyo kooxaha la heybsooco.

5) Inay Hubiyaan qoondaynta awood ku filan oo magacaabaan koox sare oo kormeereyaal iyo qiimeeyayaal ah, oo ay taageerayaan nidaamyada aqoonta ee Afrika, khubaro farsamo, iyo aalado casriyaysan oo xooggan si loogu cabbiro waxqabadka iyo maareynta xogta.

//Dhamaad//